

# Waxda Caafimaadka ee Minnesota Cudurka Xiiq-dheerta iyo Caruurta da'da Iskuulka Gaartay

## Maxay tahay xiiq-dheertu?

Xiiqda, ama Xiiq-dheertu, waa cudur leh qufac joogto ah. Qof kasta da'ada uu doonaba ha jiree xiiq-dheertu wa ku dhici kartaa.

## Maxay yihiin calaamadaha lagu garto xiiq-dheerta?

Calaamadaha ugu horeeya ee cudurka xiiq-dheerta waxay u egyihiin sida kuwa hargabka. Hal usbuuc ama laba usbuuc kadib, qufacu/qunfacu wuu sii xumaadaa wuxuuna bilaabaa in uu qofka u qabto si kedis ah oo uusan xakameyn/kontorooli karin. Qofka qaba cudurka xiiq-dheerta wuxuu u muuqdaa mid caafimaad qaba marka uusan qufaceynin (inta u dhexeysa qufacu mararka uu qabto). Qufaca ku soo booda qofka waa uu sii yaraada marka mudo la joogo, laakiin qufacu usbuucyo ama bilo dhowr ah ayuu iska sii socan karaa ilaa ay sanbabadu ka bogsoonayaan/reysanayaan.

Matag ayaa ka imaan kara qofka marka uu qufaco kadib. Caruurta waxay sameyn karaan xiiq aad u dheer oo quxda qufacu sameeyo u dhawaaq eg marka ay hawada qaadanayaan qufaca kadib.

## Ma jiraa baaritaan sheybaar oo xiiq-dheerta lagu garto?

Si loo baaro xiiq-dheerta, daloolada sankaa ayaa cudbi/suuf lagu soo tiraa/mariyaa. Walaxdii sankaa dalooladiisa lagu soo tiray ayaa kadib baaritaan sheybaar lagu sameeyaa si looga baaro jiritaanka bakteeriyada xiiq-dheerta. Dadka leh caalamadaha xiiq-dheerta oo keli ah waa in baaritaan lagu sameeyaa.

## Mudo intee la eg ayuu qofka xiiq-dheerta qaba uu ka joogayaa iskuulka ama shaqada?

Dadka xiiq-dheerta qaba waa in ay guriga joogaan oo aysan iskuul iyo howlo kaleba aadin ilaa ay ka dhameysanayaa 5 maalmood oo ay qaadanayaan daawo antibiyootik ah, marka laga reebo hadii ay horayba 3 usbuuc iyo ka badan u soo qufacayeen.

## Sidee bey xiiq-dheertu u faaftaa?

Bakteeriyada xiiq-dheerta waxaa faafiya dhibcaha goyaanka ee ka yimaada qofka marka uu qufacayo ama marka uu hindhisayo. Qoyaankaas qofka qufaciisa la socda meel dheer ma gaaro sida badanna wuxuu cudurka qaadsiiyaa dadka u dhow.

## Goorma ama mudo intee la eg ayuu qof xiiq-dheerta faafin karaa?

Dadka qaba xiiq-dheerta waxay cudurka qaadsiiin karaan dadka kale sadexda usbuuc ee ugu horeysa ee ay qufacayaan hadii aan daawo antibiyootik ah lagu daweynin. Marka qof xiiq-dheer qaba uu qaato daawo antibiyootik ah 5 maalmood kadib, isagu ama iyadu cudurka ma qaadsiiin/qabadsiiin karto dad kale.

Inkasta ee uu qufacu sii heyn karo qofka 3 usbuuc ka badan, qofku ma ahan mid cudurka faafin kara wixii ka danbeeya usbuuca sadexaad.

## Sidee baa cudurka xiiq-dheerta looga hortegi karaa?

Sida ugu fiican ee looga hortegi karo xiiq-dheerta waa in cudurka la iska talaalo. Waxaa intaa dheer, talaalada nidaamsan ee caruurta la siiyo inta ay yaryihiin, waxaa hada lagu guubaabinayaa da'yarta iyo dadka waaweynba talaal kale oo xoojinaya awooda talaalka xiiq-dheerta. Tallaalka xoojinta ah ee (Tdap) (gawracatada, teetano, xiiq-dheer) waxaa uu ku darsan yahay oo lala qaataa tallaalka teetanada iyo gawracatada. Weydii dhaktarkaaga wixii warbixin intaa dheer ah.

Dadka qaatay qaar ka mid ah talaalada xiiq-dheerta amaba qaatay gebi ahaanba qaatay talaalada xiiq-dheerta ee dadka lagu booriyo dadkaas weli cudurka xiiq-dheerta waa uu ku dhici karaa, laakiin xanuunka uu cudurku u keenayo sida badan wuxuu noqonayaa mid hooseeya.

Daawo antibiyootiko ah in la qaato ayaa mararka qaarkood lagula taliyaa si looga hortago cudurka xiiq-dheerta marka qof cudurka xiiq-dheerta qaba loo dhawaaado.

**La xiriir dhaktarkaaga hadii aad isku aragtid calaamado u eg kuwa xiiq-dheerta ama qof cudurka xiiq-dheerta qaba aad meel la joogtay (ay dhici karto in uu ku qaadsiiyey).**

### Taloovin Dheeraad ah!

Gacmahaaga dhaq marar badan  
Hadii aad jiran tahay guriga joog

Marka aad qufaceysid, afkaaga ku dabool  
mandiilka/fasaleetiga xaashida ka sameysan ama ku qufac  
dharka aad xiran tahay garbkiisa.



Vaccine-Preventable Disease Surveillance  
P.O. Box 64975  
St. Paul, MN 55164-0975  
651-201-5414, 1-877-676-5414  
[www.health.state.mn.us/immunize](http://www.health.state.mn.us/immunize)